Xuquuqaha Carruurta: Helitaanka iyo Oggolaanshaha Daryeelka Caafimaadka

Kheyraad loogu talogalay bixiyayaasha, waalidiinta iyo barayaasha

Maaha dukuminti sharci.

Kheyraadkaan waxaa loogu talogalay in lagu siiyo macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan awoodda carruurta yar yar ee oggolaanshaha adeegyada daryeelka caafimaadka, iyo sidoo kale sida macluumaadka daryeelka caafimaadka loogu daaweeyo Oregon. Loogama jeedin inay noqoto dukumiinti sharci ah ama beddelaadda talo sharci ama tilmaam ku saabsan macmiil gaar ah ama daryeel bixiye caafimaad su'aalaha la xiriira mowduucyada ku xusan daabacaddan. Dadka waaweyni waxay dooni doonaan inay ka warqabaan xuquuqaha oggolaanshaha carruurta yar yar si ay u taageeraan xiriir wanaagsan oo ay la leeyihiin dhallinyarada noloshooda. Macluumaadka kujira hagahan wuxuu soo koobayaa oo tixraacayaa, sida ugu wanaagsan ee fahankeena, sharciyada federaalka iyo sharciyada gobolka Oregon (tusaale ahaan, Xeerarka Dib loo eegay ee Oregon ama ORS), oo aan ahayn kuwa gobollada kale. Dukumintiga sidoo kale iskuma dayin inuu wax ka qabto dhaqtarka kale “hababka ugu fiican,” heerarka lagu taliyay ee daryeelka ama siyaasadaha hay'adaha ee la xiriira go'aan gaarista macmiilka. Si aad u hesho noocyada hadda jira ee sharciyadaan, tixraac xiriiriyayaasha la bixiyay inta lagu daabacay.

Oregon Health Authority

QEYBTA CAAFIMAADKA BULSHADA
Barnaamijka Caafimaadka Dadka Qaangaarka ah

Laba-labawga

Nidaamka lagu hubinayo helitaanka daryeelka caafimaadka, qarsoodiga iyo asturnaanta waxay noqon kartaa mid aad u dhib badan marka laga hadlayo carruurta yar yar. Maalin kasta, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ayaa isku dayaya inay ogaadaan: (1) nooca adeegyada ilmaha yar heli karo oggolaansho la'aan waalid; (2) marka waalidku heli karo macluumaadka caafimaadka carruurta; iyo (3) markay tahay in oggolaanshaha ilmaha yar la helo kahor inta adeeg bixiyaha uusan la wadaagin macluumaadka caafimaadka ee ilmaha. Qaanuunka gobolka, sharciyada iyo qawaaniinta federaalka waxay bixiyaan shuruudo adag oo isku qasan oo inta badan aan si hagaagsan iskula jaanqaadi karin oo laga yaabo inay caqabad ku noqoto tarjumaadda iyo hirgelinta.

Nasiib darrose, hal sharci laguma dabaqi karo dhammaan xaaladaha. Si kastaba ha noqotee, meel fiican oo laga bilaabi karo waa kheyraad sidan oo kale ah oo soo ururinaya dhammaan shuruudaha. Daryeel weyn ayaa la qaaday si loo soo bandhigo macluumaad sax ah oo u cad sida ugu macquulsan iyada oo la tixraacayo dhammaan qoraalka sharciga ama qaanuunka. Waxaan ku dhiiri galineynaa qofkasta oo la dhibaatoonaya arrimahan inuu isticmaalo dukumiintigaan meel bilow ah iyadoo la dhisayo hannaan ku dhiirigalinaya carruurta yaryar inay raadsadaan daryeel iyagoo kordhinaya sirtooda iyo asturnaantooda.

Yaa loo tixgeliyaa carruur oo maxay muhiim u tahay?

Sida uu dhigayo sharciga Oregon, qof kasta oo kayar da'da 18 waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay carruur (ORS 419B.550 [qeexitaanka carruur] iyo ORS 109.510 [da'da weyn]). Si kastaba ha noqotee, haddii carruurtu ay si rasmi ah uga xoroobeen maxkamadaha, qaar ka mid ah sharciyada khuseeya carruurta aan qaan gaarin waa laga dhaafay ([xorriyadda carruurta]). Eeg wixii faahfaahin dheeraad ah.

Guud ahaan, da'da carruurta ayaa go'aamisa inuu isagu ama iyadu awood u leeyihiin inay helaan adeegyo daryeel caafimaad si madax-bannaan ama haddii loo baahdo oggolaansho waalid ama ilaaliye. Intaa waxaa dheer, adeegyada qaar ee ilmuhu si madax-bannaan u heli karo waxaa loo hayn karaa si qarsoodi ah, halka kuwa kalena aan loo hayn karin. Tani waxay noqon kartaa macluumaad waxtar leh si loo qorsheeyo adeegyada caafimaad ee ugu haboon ee carruurta iyo dhallinyarada.

Carruurta yaryar

Qof kasta oo
ka yar da'da 18 sano

Fahamka ogolaanshaha

Waa maxay oggolaansho?

Oggolaansho waa qirashada (badanaa qoraal ahaan) mid ama dhammaan kuwa soo socda:

- Bukaanku wuu fahmay daaweynta isaga/iyada la siinayo.
- Bukaanku wuxuu oggolaanaya daaweynta.
- Bukaanku wuu fahmay sida macluumaadka gaarka loo wadaagi doono.

Oggolaansho kasta waa inuu ahaadaa **oggolaansho la wargaliyay** (ORS 677.097). Oggolaanshaha la wargeliyey ee adeegyada caafimaadka waa inuu noqdaa mid hadal ama qoraal ah waxaana ka mid ah: sharraxaadda daaweynta bukaanka la siinayo, sharraxaadda daaweynta kale iyo sharaxaadda wixii khatarro ah ee la xiriira daaweynta.

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaalooyinka xilliga **oggolaansho qoran** loo baahan yahay:

- Haddii qof ka baxsan nidaamka daryeelkaaga caafimaadka uu codsado diiwaankaaga caafimaadka; ama
- Haddii aad rabto qof kale inuu helo macluumaadkaaga caafimaad.

Carruurta **waxay codsan karaan** heerar gaar ah qarsoonaanta ama ogolaanshaha arrimaha daryeelka caafimaadka ee kala duwan iyadoo ku xiran da'dooda. Xirfadlayaasha caafimaadka ayaa awoodi kara, ama xitaa looga baahan karaa, inay shaaciyaan macluumaad caafimaad oo gaar ah oo ku saabsan bukaanada yaryar (sida cudurrada la sheegi karo ama xadgudubka looga shakisan yahay ama dayaca).

Adeegyada caafimaad ee guud iyo oggolaanshaha

Inkastoo dad waaweyn oo badan ay ka caawiyaan carruurta yaryar inay gaadhaan go'aamo daryeel caafimaad, waxaa jiri kara waqtiyo ilmaha yar uusan u baahnayn ama aanu doonayn faragelintan. Hoos waxaa ku yaal liis kooban (oo aan dhammaystirnayn) oo ah adeegyada guud iyo shuruudaha ogolaanshahooda ee Oregon.

Adeegyada caafimaadka iyo ilkaha (ORS 109.640)

Carruurta yaryar ee ah 15 sano ama ka weyn ah ayaa awooda inay oggolaadaan adeegyada caafimaadka iyo ilkaha oggolaanso waalid la'aan. Tan waxaa ku jira daryeelka isbitaalka, iyo sidoo kale daryeelka caafimaadka, ilkaha, indhaha iyo qalliinka. Tan waxaa ku jiri doona adeegyada sida:

- Daaweynta cudurrada ama dhaawacyada (hargab, canqowga murqaha);
- Dhaawacyada ciyaaraha ama xerada;
- Booqashooyinka ilkaha (baaritaano, nadiifin, buuxin);
- Adeegyada raajada;
- booqashooyinka qolka gargaarka degdegga ah;
- Daryeelka aragga (marka laga reebo booqashada ugu horreysa ee lensiga indhaha); iyo
- Tallaalada.

Caafimaadka maskaxda iyo ku tiirsanaanta kiimikada (ORS 109.675)

Ilmaha yar ee jira 14 sano ama ka weyn ayaa heli kara bukaan socodka caafimaadka maskaxda, daaweynta daroogada ama aalkolada (marka laga reebo methadone) ogolaansho la'aan waalid. Adeegyadan waxaa ku jiri kara:

- Raadinta caawinaada dhakhtarka maskaxda ama cilmu-nafsiga;
- Ka raadinta daaweynta caafimaadka maskaxda dhaqtar ama shaqaale bulsho; iyo
- Raadinta caawimaadda isticmaalka daroogada ama aalkolada.

Bixiyayaasha waxaa **laga filayaa inay la xiriiraan waalidiinta** dhammaadka caafimaadka maskaxda, daroogada ama aalkolada haddii uusan:

- Waalidku diidin ka qaybgalka;
- Muujin caafimaad oo cad oo ka soo horjeeda ayaa jirta waxaana la diiwaangeliyay diiwaanka daaweynta;
- Waxaa jira xadgudub galmo oo la aqoonsaday; ama
- Ilmaha yar ayaa la siiyay xorriyad iyo/ama laga reebay waalidka ilaa ugu yaraan 90 maalmood.

Adeegyada caafimaadka maskaxda iyo ku tiirsanaanta kiimikada, adeeg bixiyuhu wuxuu u shaacin karaa macluumaadka caafimaadka waalidka ama masuulka ilmaha sida uu qabo ORS 109.680 haddii:

- Caafimaad ahaan ay ku habboon tahay oo ay tahay danta ugu wanaagsan ee ilmaha yar;
- Ilmaha yar ay tahay in la dhigo barnaamij sun ka saarid;
- Ilmaha yar uu khatar ugu jiro inuu is dilo oo uu ubaahanyahay isbitaal dhigid.

Caafimaadka Maskaxda iyo ku tiirsanaanta kiimikada

- Inkasta oo carruurta jirta 14 iyo wixii ka weyn ay heli karaan bukaan socodka caafimaadka maskaxda iyo adeegyada ku tiirsanaanta kiimikada si madaxbanaan, waalidiinta waxaa laga filayaa inay ku lug yeeshaan daaweyntooda mar uun.
- Ka qayb qaadashadu micnaheedu maahan in dadka waaweyni ay marwalba helaan helitaanka diiwaannada caafimaadka maskaxda ama ku tiirsanaanta kiimikada.
- Qawaaniinta federaalka 42 CFR 2.14 waxay sheegayaan in haddii ilmo yar uu awoodo inuu iskiis u oggolaado daaweynta daroogada ama aalkolada, diiwaannada daaweynta ee ilmaha lama shaacin karo iyadoon la helin oggolaanshaha qoraalka ah ee ilmaha yar (oo ay ku jiraan waalidka ama masuulka).

Adeegyada caafimaadka guud iyo ogolaanshaha

Qorshaynta waalidka/caafimaadka galmada iyo taranka (ORS 109.610, ORS 109.640)

Carruuta da' kasta ha noqotee waxaa loo oggol yahay inay helaan macluumaadka iyo adeegyada la xiriira xakameynta dhalmada iyo sidoo kale baaritaanka iyo daaweynta cudurrada galmada lagu kala qaado (STIs) oo ay ku jiraan HIV, oggolaansho la'aan waalid.

Ka waran oggolaanshaha galmada?

Sharciga Oregon ma siinayo shakhsiyaadka awood ay ku oggolaadaan galmo ilaa da'da 18; hase yeeshe, waxaa jira dhowr qodob oo muhiim ah in laga fiirsado. Waxqabadka galmadu waa qayb caadi ah oo ka mid ah horumarka, sida uu qabo Xog-ururinta Caafimaadka Dhallinta ee 2009 Oregon[1] ee ardayda fasalka 11aad:

- Afartan iyo sideetan boqolkiiba waxay sameeyeen galmo.
- kuwaa, 58 boqolkiiba ayaa lasoo sheegay iyagoo isticmaalaya cinjirka galmada.

Hubinta in dhallinyarada qaangaarka ah ay haystaan ilo sax ah iyo macluumaad ku saabsan waxqabadka galmada waxay muhiim u tahay iyaga inay sameeyaan doorashooyin caafimaad qaba.

Qarsoonaanta adeegyada carruurta ee daryeelka caafimaadka

Sharciga Oregon ma siinayo carruurta "xaquuqda" **qarsoodiga ama waalidka "xuquuqda" shaacinta**. Si kastaba ha noqotee, sharciga federaalku wuxuu bixin karaa ilaalin dheeraad ah xaaladaha qaarkood. Marka ilmo yar iskood u oggolaadan adeegyada daryeelka caafimaadka, bixiyeyaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay adeegsadaan xukunkooda caafimaad ee ugu wanaagsan markay go'aansanayaan inay la wadaagaan macluumaadka waalidka ama masuulka (ORS 109.650).*‡ Si kastaba ha noqotee, dadka intiisa badan, oo lagu daray carruurta, waxay filayaan ilaa heer qarsoodi ah markay helayaan adeegyada daryeelka caafimaadka.

Bixiyayaasha iyo bukaanada qaangaarka ah waa inay ka wada hadlaan habdhaqanada qarsoodiga ee caadiga ah, iyo sidoo kale noocyada macluumaadka ee looga baahan yahay bixiyayaasha inay soo sheegaan. Tani waxay saameyn ku yeelan doontaa rabitaanka ilmaha yar ee doonaya inuu raadsado adeegyada daryeelka caafimaad ee laga yaabo sida kale inuu ka fogaado. Shuruucda ay bixiyeyaasha ama xarumaha ay ka yeelan karaan sirta carruurta iyo siidaynta looguma talogalin inay ka mamnuucaan ama ka niyad-jabiyaan carruurta yar-yar inay helaan adeegyada daryeelka caafimaadka ee loo baahan yahay, laakiin inay ku dhiirrigeliyaan taageerada saxda ah ee hannaanka go'aan qaadashada.

Sharciga Oregon wuxuu ka ilaaliyaa bixiyayaasha mas'uuliyadda madaniga ah marka baaritaan ama daaweyn la siiyo ilmo yar oo la oggol yahay iyada oo aan oggolaansho laga helin waalidka ama ilaaliyaha sharciga ah ee ilmaha yar. (ORS 109.685).

* Carruurta yaryar ee iskood u oggolaada adeegyada daaweynta daroogada ama aalkolada ee lagu daweeyo meelaha qaarkood, bixiyayaasha looma oggola inay u shaaciyaan diiwaannada daaweynta ee ilmaha yar waalidka/wakiilka iyadoon oggolaansho qoraal ah laga helin ilmaha yar soda uu qaob sharciga federaalka ah 42 CFR 2.14 (b).

‡ Dhammaan rugaha caafimaadka iyo/ama bixiyayaasha ka qaybgala barnaamijyada deeq-lacageedka Title X **waa inay** raacaan xeerarka federaalka ee khuseeya qarsoonaanta sida ku xusan 42 CFR 59.11.

Wadaagista, ilaalinta iyo helitaanka macluumaadka caafimaadka

Diiwaannada caafimaadka waxaa ku jira caafimaadka shaqsiga iyo macluumaadka kale ee lagu garto. Waxaa jira sharciyo dhaqangala oo caawinaya hubinta in diiwaanadan loo xafiday sida ugu macquulsan oo kaliya lala wadaagi karo kuwa loo idmaday inay helaan macluumaadkan. Hoos waxaa ah dulmar guud oo degdeg ah oo ku saabsan noocyada kala duwan ee ilaalinta ee la xiriirta diiwaanada caafimaadka iyo macluumaadka kale ee gaarka ah.

Qarsoonaanta

Qarsoonaantu waa heshiis u dhexeeya bukaanka iyo bixiyaha si loo hubiyo in macluumaadka shaqsiyeed lala wadaago oo keliya kuwa bukaanku oggolaado inuu la wadaago macluumaadka leh. Inta badan, bixiyayaasha looma oggola inay la wadaagaan macluumaadka caafimaadka ee gaarka ah cidna, ilaa warqad siideyn oo saxeexan ay ku jirto fayl sheegaya waxa kale. Waxa kale oo jira sharciyo qaran, sida HIPAA iyo FERPA, oo caawiya ilaalinta sirta bukaanka. Si kastaba ha noqotee, waxaa jira dhowr waxyaalood oo ka reeban marka macluumaadka caafimaadka la wadaagi karo ama ay tahay in la wadaago, loona yaqaan warbixin qasab ah (eeg bogga 4 wixii macluumaad dheeraad ah).

Wadaagista, ilaalinta iyo helitaanka macluumaadka caafimaadka, sii socota.

Warbixinta qasabka ah

Waxaa jiri kara waqtiyo macluumaadka caafimaadka ee ilmaha yar ay tahay in loo sheego hay'adaha kale. Macluumaadka caafimaadka qaarkood waa in lala wadaago maamulka caafimaadka ee deegaanka, oo ay ku jiraan kiisaska qaba cudurrada qaar iyo cudurrada faafa (sida qaaxada, fayraska West Nile ama HIV/AIDS). Macluumaadkan waxaa loo soo ururiyey si loola socdo qaababka cudurrada iyadoo ujeedadu tahay in laga hortago infekshannada dheeraadka ah ama xanuunada dillaaca. Si aad wax badan uga ogaato cudurada iyo xaaladaha loo sheegi karo dhakhtarka Oregon, booqo http://public.health.oregon.gov/diseasesconditions/communicabledisease/tabintawar-baahinta/bogagga/index.aspx.

Waqtiyada kale, maamulada ku habboon waa in lala socodsiiyaa haddii ay jiraan walaacyo caafimaad ama badbaado oo la xiriira ilmo yar ama qaangaar nugul, xitaa hadduu ilmuhu si qarsoodi ah ku bixiyay macluumaadkan (sida xadgudub, dayacaad, ama waxyeello dhow oo loo geysto qofka yar ama qof kale). Qaar ka mid ah xirfadlayaasha caafimaadka iyo xirfadlayaasha adeegga bulshada ayaa sharci ahaan looga baahan yahay inay soo sheegaan walaacyada noocyadaan caafimaad iyo nabadgelyo

Soo sheegayaasha ay waajibka ku tahay waxa ku jira (ORS 419B.005*):

- Dhakhaatiirta & Kalkaaliyayaasha
- Shaqaalaha bulshada
- Macallimiinta
- Bixiyayaasha daryeelka maalinta
- Saraakiisha booliska
- Shaqaalaha kale ee gobolka
- La-taliyayaasha caafimaadka maskaxda (xaaladaha qaar)
- Shaqaalaha jaamacadaha iyo kulliyadaha bulshada
- Tababbarayaasha & hoggaamiyayaasha kooxaha dhallinyarada

Xaaladaha warbixinta qasabka ah

Waxaa jira waqtiyo ay waajib tahay in macluumaadka sirta ah la soo sheego:

- Cudurrada faafa iyo kuwa la is qaadsiiyo ee la soo sheegi karo;
- Shaki xadgudub ama dayaca shaqsi nugul
- Gelitaanka barnaamijka sun ka saaridda khamri ama daroogo; iyo
- Shakhsi halis ku ah caafimaadkiisa ama amnigiisa ama kuwa kale.

Intaa waxaa sii dheer, haddii qofku ka yar yahay 18 sano, waxaa jira duruufo bixiyeyaasha loo oggolaado inay la wadaagaan macluumaadka caafimaadka ilmaha yar waalidka ama masuulka (ORS 109.680). Faahfaahinta ka eeg qaybta ku tiirsanaanta caafimaadka maskaxda iyo kiimikada ee bogga 2aad.

* Tixraac ORS 419B.005 liis buuxa oo faahfaahsan oo ku saabsan jagooyinka lagu qeexay soo sheegayaasha ay waajibka ku tahay iyo kuwa laga reebay.

Sharciyada asturnaanta ee qaranka: HIPAA and FERPA

Waa maxay HIPAA?

HIPAA waxay u taagan tahay Sharciga La Xisaabtanka iyo Hab socodsiinta Caymiska Caafimaadka. Sharcigani wuxuu abuuray heerar qaran si loo ilaaliyo macluumaadka bukaanka lagu aqoonsan karo ee ku jira diiwaanada caafimaadka. HIPAA sidoo kale waxay u oggolaanaysaa bukaan socodka marin ballaaran oo ay ku heli karaan diiwaanadiisa/deeda. HIPAA ayaa xukunta siyaasadaha asturnaanta ee goobaha daryeelka caafimaadka, isbitaalada iyo rugaha caafimaad ee kale ee madax-bannaan, oo ay ku jiraan xarumaha caafimaadka ee dugsiga Oregon ee la aqoonsan yahay.

Waa maxay FERPA?

FERPA waxay u taagan tahay Sharciga Xuquuqda iyo Asturnaanta Waxbarashada Federaalka. Sharcigan wuxuu la mid yahay HIPAA, laakiin wuxuu khuseeyaa goobaha dugsiga wuxuuna qeexayaa helitaanka iyo ilaalinta diiwaanka waxbarasho ee ardayga, oo ay ku jirto diiwaanka caafimaadka iskuulka ee ay kalkaalisada caafimaadka ee iskuulku hayso. Marka la eego FERPA, diiwaanka waxbarashadda waxaa codsan kara waalidiinta iyo qaar ka mid ah saraakiisha dugsiga. Si kastaba ha noqotee, diiwaannada lagu hayo xarumaha ku salaysan caafimaadka dugsiga ee Oregon waxaa xukuma HIPAA, ma ahan FERPA.

Labadan sharciyadood ee asturnaanta waxaa loogu talogalay in lagu ilaaliyo macluumaadka qarsoodiga ah ee shaqsiyaadka ku sugan goobaha kala duwan ee macluumaadka gaarka loo isticmaalo. Waa muhiim in la ogaado macluumaadka loo arko inuu yahay "mid la ilaaliyay" labadaba HIPAA iyo FERPA marka la bixinayo iyo helitaanka macluumaadka caafimaadka (eeg bogga 5aad lingax-yada macluumaadka dheeraadka ah).

Ilaha Dheeraadka ah

Ilaha guud

Xarunta Caafimaadka Dhallinyarada iyo Sharciga - *www.cahl.org*

Qarsoodiga iyo Dhallinta - *https://www.aafp.org/about/policies/all/adolescent-confidentiality.html*

Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Sharciga Asturnaanta - *www.ed.gov/policy/gen/guid/fpco/ferpa/index.html*

Xeerarka dawladda dhexe ee ku saabsan sirta xogta diiwaanka daroogada iyo aalkolada ee carruurta yar (42 CFR 2.14) - *https://www.govinfo.gov/content/pkg/CFR-2014-title42-vol1/pdf/CFR-2014-title42-vol1-sec2-14.pdf*

Sharciga La Xisaabtanka iyo Hab socodsiinta Caymiska Caafimaadka - *http://www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/*

Xuquuqda carruurta yaryar ee oggolaanshaha ee gobolka - *www.guttmacher.org/statecenter/spibs/spib_MACS.pdf*

Barnaamijka Caafimaadka Dhallinta ee Oregon - *www.healthoregon.org/ah*

Qaanuunka Dib loo Eegay ee Oregon (ORS) - *www.oregonlaws.org* and *www.leg.state.or.us/ors*

Kheyraadka loogu talogalay dhalinyarada iyo waalidiinta

Hagaha adeegyada qarsoodiga ah iyo macluumaadka loogu talogalay dhalinyarada - *www.cahl.org/PDFs/AGuideforTeensBrochure .pdf*

Planned Parenthood - *www.plannedparenthood.org*

Kheyraadka caafimaadka galmada ee dhallinta ee ay qoreen dhallintu - *www.sexetc.org*

Tixraacyo

1 Xog-ururinta Caafimaadka Dhallinyarada ee Oregon. 2009. Macluumaadka la heli karo *https://www.oregon.gov/oha/PH/BIRTHDEATHCERTIFICATES/SURVEYS/Pages/student-health-survey.aspx.*

Oregon Health Authority

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA
Barnaamijka Caafimaadka Dhallinyarta
800 NE Oregon, Suite 805
Portland, OR 97232
Telefoon: 971-673-0249
www.healthoregon.org/ah

Dhokumentigan waxaa lagu siin karaa codsiga qaab kale dadka naafada ah ama luqad aan ahayn Ingiriisi dadka leh xirfadaha Ingiriisiga xadidan. Si loo codsado daabacaan oo ku qoran qaaba kale ama luqad kale la xidhiidh ADA.dhs@dhsoha.state.or.us.

OHA 9541 (04/21/2021) Somali